

Guddiga Talabixinta Diiwaangelinta Yaraaneysa ee DPS

Kulanka 4aad / Caqabadaha Diiwaangelinta Yaraaneysa, 6dii Abriil, 2022

Arrimaha Mawduucyada	Qoraallo & Linkiyo
Soo-dhaweyn & Isxaadirin	<p>Kulamadu waxay ku bilowdaan 4ta galabnimo soo-dhaweyn iyo isxaadirin. Luuqadaha la turjumayo ayaa la sheegaa, oo waxaan ku bilownaa in aan wadaagno wixii ah akhbaarta wanaagsan ee toddobaadka. Todobaadkan waxaa noo suurta gashay in aan wax ka qabanno qaar ka mid ah tabashooyinka guddiga annagoo u sameynay kulamo ahaa su'aalo & jawaabo oo ka duwan kulankan. Fursadda hadda jirta, xubnaha guddigu waxay awoodaan in ay wax ka qabtaan welwelkooda marka hore, oo waxay diiradda saari doonaan hawlaha hadda iyo natiijooyinka. Ka hor inta aan la bilaabin kulanka waxaan dhowr daqiiqo sameynay nasiino si aan dhammaanteen u qaban karno shaqo aan iska hubin karno nafteena iyo tamarta aan goobta la imaannay.</p>
Meel badqabid leh	<p>Kulanka 3aad ka dib, waxaa jiray walaac ku saabsan sinnaanta goobta iyo codadka qaar oo ka qeylo dheeraa kuwa kale. Arrintan ayaanu uga hadlay anagoo xasuusineyna guddiga sababta aan u nimid. Waxaan isticmaalnay su'aal na hageysa oo ahayd "Maxay degmadu u baahan tahay inay tixgeliso marka la xirayo ama la isku darayo iskuullada?" si kooxda loogu hawlgeliyo. Waxa kale oo aanu sameyneyn hab noo ahaa oggolaansho in la dhageysto dadka ra'yiga adag iyada oo aan la carqaladeyn kulanka. Hadafka kooxda fududeyntu waa in ay dhexdhexaad noqdaan iyaga oo gacan ka geysanaya fududeynta wada hadalka ku saabsan hoos u dhaca diiwaangelinta iyo saameynta isku darista ama xiritaanka iskuulka. Waxaan qirnay in uu weli khilaaf dhici karo, laakiin waxaa kooxda xasuusinnay in aan heshiiska la wadaageyno ka hor kulan kasta. Sofiya waxa kale oo ay si kooban uga hadashay ujeeddada FACE oo kulankan qeyb ka ahayd. Waraaqo ah su'aalo iyo jawaabo ayaa sidoo kale bulshada loogu diyaarinayaa su'aalo guud ahaan.</p>

Arrimaha Mawduucyada	Qoraallo & Linkiyo
Mabaadi'da Nakhshadda/Hagidda	<p>Wadahadalkan kooxdu waxay ay uga fekeray qaabeynta/mabaadi'da hagidda talooyinka shuruudaha la xiriira isku-darista ama xiritaanka iskuulka. Arrintaas waxa la sameeyey iyada oo la adeegsanayo habka go'aan qaadashada wada-shaqeynta oo ka timid Qaabdhismeedka Xoreynta ee loo yaqaan "1-2-4-All". Habka waxaa loo fuliyey in ay kooxdu midba midka kale ka munaqishoodaan welwelkooda, walaacooda, rajooyinkooda, iyo rabitaankooda oo ay ka dibna u sii beddelaan mabaadi'. Waa kan linkiga waraaqaha hordhaca ah.</p> <ul style="list-style-type: none"> ● 1: Kooxda waxaa la siiyey shaqo-guri si ay u bilaabaan inay ka soo fekeraan mabaadi'da hagidda ee loo isticmaali karo habraacan. Hab shaqsi ah ayaa loo sameeyay oo waxaa dib loogu soo noqday kulankii. ● 2: Shakhsiyaadka kooxda ayaa markaas loo qeybiyey labo-labo si ay uga doodaan oo ay u mideeyaan fikradahooda ah mabaadi'da hagidda. ● 4: Laba qof oo kasta ayaa markaa lagu daray laba qofood oo kale si ay isugu noqdaan koox afar ah. Kooxdu waxay ka doodeen liiskooda, waa isku biireen, oo waxay ku dareen wax kasta oo maqan. ● Dhammaan: Ugu dambeyntii waxaa dib loo soo celiyay guddigii guud ahaan, oo waxay wadaageen liisaska la isku daray oo ah koox-koox.
Shuruudaha Fikrad-keenista ee Kooxaha Affinity	<p>Hawshan waa la gaabiyey wakhtiga oo ciriir ah awgeed. Guddiga waxaa loo xilsaaray in uu hal tabarruce oo ka tirsan koox kasta oo xiriir ah bilaabo diyaarinta fikradaha bilowga ah ee shuruudaha. Ka dib waxay heli doonaan jawaabta xubnaha kale ee kooxdooda iyo beesha, oo waxay dib ugu soo sheegi doonaan kooxda wixii isbeddel ah. Kooxaha xiriirka la leh ee liiska lagu daray waxaa ka mid ah: Macallimiinta, Maamuleyaasha Iskuullada, Waalidiinta/Qoyska, Xubnaha Bulshada, Iskuulka/Degmada/Dalladda Shaqaalaha</p>
Tallaabooyinka Xiga	<ul style="list-style-type: none"> ● Dibu-eegis looga wada hadlo qebyada bilowga ah ee shuruudaha ● Codsii ah in jawaabo laga helo xubnaha bulshada ● Wada-hadal ah wixii tabasho ah ee ka yimaada bulshada ama kooxda